


JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال

SHARCIGA DHISMAHA COMPANY
(GOLDEN HORSE CONSTRUCTION & TRADING COMPANY)



MUQDISHO-SOOMAALIYA

2022



UJEEDO:- DHISID COMPANY GOLDEN HORSE CONSTRUCTION & TRADING COMPANY

Maanta oo ay taariikhdu tahay **08/02/2022**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

1- MOHAMED AHMED NUR ALI, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Somali Passport No. P00693459. Ahna Gudoomiyaha Companiga

2- BURHAN MOHAMED ALI, Somali ah, Degan Muqdisho Lehna Somali Passport No.P00930331. Anha Gudoomiye Kuxigeen Companiga

3- AHMED NUR ALI JAMA, Somali ah, Degan Muqdisho Lehna Somali Passport No P00910810. Ahna Xubin katirsan Shirkada.

Mudanayaasha kor ku xusan iyaga oo caafimaad qaba, caqligoodunu taam yahay, cid heshiisnaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxey i weediisteen inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD

MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA
MAGACA SHIRKADDA GOLDEN HORSE CONSTRUCTION & TRADING COMPANY.



QODOBKA 2-AAD
WAQTIGA LA AASAASAY SHIRKADDA

Shirkadda **GOLDEN HORSE CONSTRUCTION & TRADING COMPANY**, waxaa la aas'aasay 31-Jan-2022, waxaana lagu aas'aasay magaalada muqdisho ee caasimadda soomaaliya sida ku cad warqada shatiga no.0190449.kana soo baxday D/hoose ee muqdisho.

QODOBKA 3-AAD
XARUNTA SHIRKADDA

Xarunta Shirkadda **GOLDEN HORSE CONSTRUCTION & TRADING COMPANY**, waa magaalada Muqdisho Ee caasimadda Soomaaliya, waxayna xafiisyo iyo laamo ku yeelan kartaa dhammaan dalka gudahiisa iyo dibaddiisaba.

QODOBKA 5-AAD
NOOCA SHIRKADDA.

- Shirkaddani waa shirkad saamiley xadidan (Limited Liability Company) haddaba saamile kaste waxuu mas'uul ka yahay hatidisa shirkadda inta ay dhantahay.



QODOBKA 6-AAD
UJEEDADA SHIRKADDA

Ujeeddada Shirkaddu Waa:

- Qaadashada qandaraasyada ay bixiyaan hay'adaha iyo Dawladda
- Qabasha adeega saadka iyo qeybintooda (Logistic Service and Supplies)
- Gudashada Howl kasta oo la xiriirta maalgelinta dalka.
- Abuuridda dakhli Cusub oo wax looga qabanayo shaqa la'aanta dalka ku baahsan
- Fulinta Mashaaricda Maalgelinta la xiriirta iyo hormarinta dalka
- Keenida Farsamo Cusub oo ku haboon duruufaha dalka.
- In ay qayb wayn ka qaadato dhisidda dhaqaalaha iyo horumarka bulshada Somaliyeed
- In ay abuurto ila dhaqaale iyo adeegyo ay ka faa'idaystaan qeybaheeda kala duwan.

QODOBKA 7-AAD

RA'SUMAALKA SHIRKADDA IYO SIDA LOO KALA LEEYAHAY.

- Raa'sumaalka Shirkadda waa \$200,000 (Labo Boqol kun oo dollar). Waxaana ku talagalka Shirkaddu yahay in Raa'sumaalka shirkadda la kordhiyo ayada oo loo marayo in sheerer loo furo maalgashadayaasha Cusub.waxaana loo kala leeyahay sida soo socota.

NO	MAGACA	BOQOLKIIBA
1-	MOHAMED AHMED NUR ALI	40%
2-	BURHAN MOHAMED ALI	30%
3-	AHMED NUR ALI JAMA	30%
TOTAL		100%

QODOBKA 8-AAD

QAAB-DHISMEEDEKA SHIRKADDA

1. MAXAMED AXMED-NUUR CALI Ahna Gudoomiyaha Shirkadda.
2. BURHAAN MAXAMED CALI Ahna g.Ku xigeenka shirkadda.
3. AXMED-NUUR CALI JAAMAC Ahna Xubin ka mida shirkada

QODOBKA 9-AAD

GUDDOONKA SHIRKADA

Gudoomiyaha Ugu Horreeya Ee Shirkadda Waxaa Loo Magacaabay Mudane **MAXAMED AXMED-NUUR CALI** Oo Jagadaas Heynaya Inta Laga Bedelayo Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Shirkadda, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Shirkada Rahana Gelin Karo Hantida Shirkada , Kana Saari Karo U Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Shirkada Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkada .Marka Uu Maqan Yahay Gudoomiyuhu Waxaa Shaqadiisa Sii Wadaya G/Kuxigeenka Shirkada Mudane **BURHAAN MAXAMED CALI** Wuxuuna Qaban Doonaa Shaqadii Uu Gudoomiyuhu Qaban Lahaan Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Shirkada Rahana Gelin Karo Hantida Shirkada , Kana Saari Karo U Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Shirkada Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shikado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkada .



QODOBKA 10-AAD
TIRADA DADKA AAS'AASAYAASHA AH

- Shirkaddu waa saamileey ay lahaanshaheeda leeyihiin sadaxda qof ee sare ku xusan.
- Maamulka sare ee shirkadda (board of directors), waxaa uu ka kooban yahay sadax xubnood oo milkiilayaasha ah, waana hay'adda ugu sareysa shirkadda, ayaga ayaana dooranaya xubnaha fulinta (executive officers) ee wadaya howl maalmeedka shirkadda.
- Xeer hoosaadka shirkadda ayaa lagu cadeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya xeer hoosadyada aas'aasayaasha shirkadda. Waxa ayna xeerhoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka guud ee shirkadda.
- Qofkii lumiya xubinnimadiisa ama iibsada saamigiisa oo dhan waxaa ka reeban in uu sii isticmaalo magaca iyo astaanta shirkadda.

QODOBKA 11-AAD
BUUGGA HANTIDA SAAMILEYDA

Buugga hantida saamileyda waxaa ku cad qodobada soo socda:

- Inta uu la'eg yahay qiimaha saami kasta, inta saami uu leeyahay xubinkasta, magaciisa/magaceeda, xaddiga uu u dhiibay, taariikhda la dhiibay, lambarka boonada loo jaray, iyo dhamman warbixinadiisa oo tifatiran.
- Buuggaas waxaa keydinaya xoghayaha maamulka shirkadda.
- Waxaa saxiixaya maamulka shirkadda marka la dhameystiro caddeymaha saamiga iyo saamilaha.
- Saamilaha waxaa la siinayaa shahaado caddeyneysa saamigiisa, waxaana saxiixaya maamulka shirkadda.

QODOBKA 12-AAD
KORDHINTA IYO DHIMIDDA RA'SUMAALKA SHIRKADDA

- Maaliyadda shirkadda waa la kordhin kara, waana la dhimi karaa, haddii ay sidaas isku raacaan xubnaha shirkadda lana waafajiyo sharciga shirkadda.

QODOBKA 13-AAD
IIBINTA SAAMI

- Xubin Kasta Waxay Iibin Kartaa Saamigeeda Ay Ku Leedahay Shirkadda, Waxaana Mudnaanta La Wareegidda Koowaad Leh Xubnaha Shirkadda, Haddii Muddo Hal Bil Ah La Waayo Xubin Ka Mid Ah Shirkadda Oo La Wareegta Saamiga La Iibinayo Saamiluhu Waxaa Uu Xaq U Leeyahay Inuu Ciddii Dalbaneysa Oo Aan Wadanka Danbi Ka Galin Ka Iibiyo Kadib Marka Ay Aqbalaan Qofkaas Gudiga Sare Ee Aas'aasayaasha.

QODOBKA 14-AAD
XUBINTII GEERIYOOTA

- Xubinta geeriyoota oo ka mid ah hantilayaasha shirkadda waxaa saamigiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah, oo ay soo caddeyso maxkamad, kadib waxay soo magacaabanayaan wakiil haddii ay ogolaadaan in shirkadda ay kashii mid ahaadaan, sidoo kale haddii ay dalbadaan in saamigooda la baxaan sanadka xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.



QODOBKA 15-AAD
ILAHA MAALGALINTA SHIRKADDA

- Ilaha maalgelinta Shirkadda waa maalgelinta saamileyda, iyo Deymaha waafaqsan Shareecada Islaamka.

QODOBKA 16-AAD
XISAABTA SHIRKADDA

- 1- Xisaab xirka shirkadda :- xisaabta shirkadda waxaa la xirayaa 31 ka december ee sanadkasta dhammaadkiisa.
- 2- Zekada:- xisaab xirka ka dib, inta aan la qeybin faa'idada iyo khasaaraha waxaa laga bixinayaa zekada ku waajibtay hantida shirkadda waxaana masuulideeda leh maamulka shirkadda (executive director).
- 3- Qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha:- qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha waxaa lagu jaangoynayaa saamiga ay xubin kasta ku leedahay hantida shirkadda. Waxaana la qeybinayaa 31 janaayo.

QODOBKA 17-AAD
SHARUUDAHA KA MID NOQOSHADA

Qofka xubin rasmi ah ka noqon kara shirkadda:-

- Waa inuu ogolaansho ka haystaa shirkadda si uu uga mid noqdo saamileyda.
- Waa inuu dhiiba saamiga u xadidan shirkadda oo dhamaystiran.
- Waa in uu ogolaado, saxiixana xeerka shirkadda.
- Waa in uuna dalka ka galin fal dambiyeed ama ficilo wax u dhimaaya sumcada qofka.

QODOBKA 18-AAD
LUMINTA XUBINNIMADA

- Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamileyda shirkadda.
- Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda.
- Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca shirkadda.
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.

QODOBKA 19- AAD
MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA.

Mudada Jiritaanka Shirkadda waa 50 Sano.

QODOBKA 20- AAD
BAABI'IDDA SHIRKADDA

Shirkadda waxay ku baabi'i kartaa marka ay timaado xaladaha hoos ku xusan:-

1. Haddii ay dhammaan xubnaha shirkadda isku raacaan baabi'inta shirkadda.
2. Haddii uu burbur ku yimaado dhammaan hantida shirkadda.
3. Haddii ay soo wajahdo hoos u dhac maaliyadeed ayna weydo kabidda saamileyda.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabi'inta shirkadda nuucaan ah.



QODOBKA 21-AAD

HABKA UU KU DHACAYO BAABI'IDA SHIRKADDA

Baabi'idda shirkadda waxaa uu ku dhacayaa sida soo socota:-

1. Diyaarinta heerka maaliyadeed ee shirkadda.
2. Bixinta daymaha shirkadda lagu leeyahay.
3. Khasaaraha wuxuu ahaanaya hadba inta boqolkiiba uu saamigiisu la'eg yahay qofka.

QODOBKA 22-AAD

FADHIYADA SAAMILEYDA

Fadhiyada saamileyda waxay u dhacayaan sida soo socota:-

1. Kulamada caadiga ah ee saamileyda waxay dhacayaan sanadkiiba mar.
2. Kulamada aan caadiga ahayn, gudoomiyaha waxaa uu iskugu yeeri karaa kulamo deg deg ah haddii loo baahdo, sidoo kale haddii ay isku raacaan xubnaha shirkadda.
- 4- Xubin walba waxay xaq u leedahay in la soo gaarsiyo ogeysiis kulanka caadiga ah muddo bil ka hor

QODOBKA 23-AAD

CODKA SAAMILEEYDA

Codka saamileyda shirkadda waxaa loo raacayaa laguna qaadanayaa hal-dheeri haddii ay isla ekaadaan oo ay is garab dhacaan xubnaha shirkadda ee wax dooranaya waxaa loo raacayaa dhinaca gudoomiyuhu la jiro taas oo noqoneysa aqlabiyadda saxda ah.

QODOBKA 24-AAD

GUDOOMINTA SHIRARKA

- Shirarka kala duwan ee shirkadda, waxaa shir gudoominaya gudoomiyaha shirkadda, haddii uu maqan yahay gudoomiyaha, waxaa shirarka gudoominaya ku xigeenkiisa ama madaxa xisaabedka shirkada iyo cidii kale oo si qoraal ah ugu wakiisho gudoomiyaha marka lawaayo ku xigeenkiisa iyo madaxa xisaabedka shirkada.

QODOBKA 25-AAD

WAXYAABAHA AAN LAGU XUSIN XEERKAN

- Dhammaan waxaa aan lagu sheegin xeerkan waxaa loola noqonaya sharciga islaamka qeybta mucaamalaadka iyo shirkadaha, sidoo kale qawaaniinta dalka u degsan.
- F.g wixii sharecada islaamka ka hor imaanaya waa waxba kama jiraan.

QODOBKA 26-AAD

ISTICMAALIDDA MAGACA SHIRKADDA



- Magaca shirkadda ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida shirkadda sida: guryaha, dhulalka, gaadiidka, bank account, heshiisyadda, timbarayaasha iwm.



QODOBKA 27
HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY
27 QODOB 1 COVER , 6 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.

SAXIIXA MILKIILAYAASHA


MOHAMED AHMED NUR ALI

BURHAN MOHAMED ALI




AHMED NUR ALI JAMA





(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 071/T.P.N/22, Tr. 08/02/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana ay saxiixeen milkiilayaasha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magacyadaas inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyadan kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"







FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA ORJINAALKA AH

REP.071 /2022.

Tr,10/02/2022,

Magaca qaadaha: →

Burhaan Maxamed Cali

Meeshuu deganyahay →

002wayn R

Telfoonkiisa: →

0615630062

SAXIIXA BIXIYAHA:

SAXIIXA QAADAH:

Burhaan